



Imaanshaha Norway

- ✎ Aamiina
- 👤 Julie Cornelia van Walsum
- 💬 Mohamed Abdirashid
- 📊 5
- 🗣️ Soomaali



Aniga iyo labadayda walaalo waxaan nimid Norway December 2016. Waxaan xirnayn dharka xagaaga, sababtoo ah waxaan u maleynaynay inay kulushahay Norway sida Soomaaliya. Si kastaba ha ahaatee, markii aan nimid garoonka diyaaradaha, waxaa jiray baraf. Waxaana jiray qabow, cimiladuna waa ay qaboobaayd. In kasta oo aannu dhawr boorsooyin wadanay, haddana waxaan wadanay oo keliya dharka xagaaga.



Inkasta oo ay qabow ahayd, aad ayaan ugu farxay markaan Norway nimid. Waxaan ugu dambeyntii la kulmi lahaa hooyaday markale, oo aanan arag muddo lix sano ah. Hooyaday iyo laba saaxiibadeheed ayaa nala kulmay. Markaan aragnay iyadii ayaannu farxad la oohnay. Waxaan u sii raacnay magaalada yar ee ay hooyo ku nooshahay.



Maalmihii ugu horreeyay ee magaalada hooyo degantahay waxay ahaayeen kuwo la yaab leh. Qabow iyo baraf baa da'ay oo wax badan ma jirin. Waddooyinka ayaa gabi ahaanba faaruq ahaa. Dadka yar ee aan la kulmay waxay u muuqdeen kuwo aamusan oo aan wax saaxiibtinimo lahayn. Soomaaliya waxaa jiray dad meel walba jooga, sidaa darteed wax walba waxa ay dareemayeen si nooc kale ah halkan. Hooyaday iyo saaxiibadeed waxay na siiyeen xoogaa hadiyado ah, ka dibna waxay noo kaxaysay suuqa si aan u soo iibsanno dharka qabowga.




Kadib fasaxa Kirismaska waxaan ku biiray koorsada Norwejiga ee xarunta waxbarashada dadka waaweyn. Waxaan halkaas ku bartay laba sano ka hor intaan bilaabin iskool caadi ah. Hadda waxaan ku jiraa sannadkii ugu dambeeyay, waxaan yeeshay saaxiibo badan oo cusub. Waxaan ahay qof bulshaawi ah oo waxaan ka helaa la kulanka dadka kale.



Iskoolka ka dib waxaan aadaa xarun ay maamulaan dad iskaa wax u qabso ah halkaas oo aan ka helo caawinta shaqada gurigayga. Waxaan sidoo kale ku biiray koorsada harqaanka ee xarunta.



Soomaaliya waligey iskool ma dhigan mana dhigan koorso aan ka ahayn dugsi quraan. Ma aqoonin sida wax loo akhriyo ama loo qoro. Hadda waxaan bartay sida loo qoro af-soomaali iyo af-noorwiiji, iyo maadooyin kale oo badan. Waxbarasho la'aanteed waxaan dareemay inaan qofna ahayn. Hadda waxaan dareemayaa inaan ahay qof aqoon iyo farxad leh.



Sannadka soo socda waxaan bilaabi doonaa iskoolka sare ee qaybta caafimaadka iyo horumarinta dhalinyarada. Mustaqbalka waxaan rabaa inaan noqdo shaqaale dhalinyaro ah. Markaan dhammeeyo waxbarashada, riyadeydu waa inaan helo shaqo joogto ah. Waxa kale oo aan rabaa in aan barto darawalnimada oo aan helo shatiga darawalnimada.



Haddaan Soomaaliya joogi lahaa, waxaan filayaa inaan hadda hooyo ahaan lahaa. Laga yaabaa in aan hore u yeelan lahaa carruur badan. Haddii aan Soomaaliya joogi lahaa, ma helin fursadaha aan hadda haysto. Waxaan dareemayaa inaan nasiib leeyahay in aan ku noolaado Norway.



LIDA Stories

lidastories.net

Imaanshaha Norway

 Aamiina

 Julie Cornelia van Walsum

 Mohamed Abdirashid

